

BAARITAANKA COVID-19

Baarintaanka COVID-19 ayaa sidii hore si ka badan hadda looga heli karaa Minnesota.

Fiidiyowgan ayaa sharraxaya qofka ah inuu iska baaro cudurka, iyo meesha la iskaga baarayo, iyo sida loo helo natiijooyinkaaga.

Yay tahay in laga baaro COVID-19?

Dadka leh calaamadaha xanuunka COVID-19 ayay tahay in la baaro.

Calaamadaha waxa ka mid ah qandho, qufac, neefsashada oo gaabata, murqo xanuun, madax xanuun, cuno xanuun, qarqaryo, ama dareenka dhadhamada ama urinta oo qofka ka taga.

Kala hadal dhakhtarkaaga ama isticmaal aaladda baarista onlaynka ah ee laga helo barta internetka U Minnesota COVID Response website) si aad u ogaato bal in aad u baahan tahay in lagu baaro iyo in kale. Caawimoka raadso qoyskaaga, asxaabtaada ama cid kale oo ku caawin karta haddii aadan aqoon sida loo isticmaalo websaydka.

Halkee la igaga baari karaa xanuu ka COVID 19?

Rugaha caafimaadka iyo isbitaallada badankood ayaa ku shaybaadhi kara

Si aad u ogaato meesha lagaaga baari karo, wac dhakhtarkaaga ama booqo website ka Minnesota COVID19 Response. Caawimoka raadso qoyskaaga, asxaabtaada ama cid kale oo ku caawin karta haddii aadan aqoon sida loo isticmaalo websaydka.

Kahor intaadan aadin goobta baaritaanka, horay ugu sii wac ama fiiri tilmaamaha kuu yaal khariiddada goobaha baaritaanka iyo waxyaabaha u gaarka ah goob kasta, waayo goobuhu isku wada mid maaha.

Sideen ku heli karaa natiijada?

Rugta caafimaadka ee sameysay baaritaanka ayaa kuula soo xiriiri doonta si ay kuugu sheegaan natiijada.

Waxay qaadan kartaa dhowr maalmood.

Ha la xiriirin Waaxda Caafimaadka Minnesota si aad u hesho natiijadaada shaybaarka.

Si aad u isticmaasho aaladda baaritaanka onlaynka ah ama khariiddada meelaha la isku baari karo booqo mn.gov/covid19

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975 St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

05/26/20

Testing for COVID-19 (Somali)

To obtain this information in a different format, call: 651-201-4989